

Boils

Boils are painful bumps that are filled with pus. Boils form under the skin when bacteria infect a hair follicle. A follicle is where a hair forms. Boils may occur anywhere on the body, but are most often found on the face, neck, armpits, buttocks and thighs. A boil often lasts about 14 days.

Signs of Boils

A bump or open sore that:

- Grows quickly, often within 24 hours
- Is red, yellow or white at the tip
- Has drainage or pus as the boil breaks open
- Swells
- Is warm
- Is tender or painful

Your Care

- Keep your skin clean.
- Do not pick or squeeze the boil. Bacteria can spread to nearby skin and cause new boils.
- Apply a clean, warm, wet washcloth to the area several times a day to aid healing and reduce swelling.

Call your doctor if you have:

- Signs that worsen
- A very painful boil
- A boil that has not healed in 14 days
- A large boil
- A fever
- More boils
- Red lines coming out from a boil. This may be a sign that the infection has entered your blood stream.

Talk to your doctor or nurse if you have any questions or concerns.

8/2007. Developed through a partnership of Mount Carmel Health, Ohio State University Medical Center, and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.org.

Kasoo-bax

Kasoo-baxu waa finan xanuun badan oo ay ka buuxsanto malaxi. Finankaasi waxay ku samaysmaan dubka/maqaarka/haragga hoostiisa marka bakteeriya ay bukaysiiso halka ay kasoo baxaan timaha xaaddu. Waa gunta tinta. Finanka kasoo-baxa waxay ku samaysmi karaan meel kasta oo jidhka ah, waxaase inta badan lagu arkaa wajiga, luqunta, kilinkillooyinka, salalka badhida iyo laabatooyinka jilbaha. Finka kasoo-baxa wuxuu ku dhammaadaa 14 cisho qiyaastii.

Calaamadaha Kasoo-baxa

Finan amase godad yaryar oo malax leh, kawaasoo:

- Si dhaqso leh ayay u koraan, sida caadiga ah 24 saacadood gudohood
- Waa casaan, huruud amase cidhifka sare ka cad
- Waxaa ka soo baxa dheecaan ama malax marka uu finku bururo
- Way barartaa
- Way diirran tahay
- Xanuun bay leedahay

Waxaad ku dawaynaysaa

- Jidhkaaga oo aad nadiifiso.
- Ha daloolin finka hana tuujin. Bakteeriyadu way kusoo fidi kartaa jidhka u dhow finkan, oo keeni kartaa finan kale.
- Ku masax mara diiran oo nadiif ah dhowr jeer maalintii, kuna dawee si uu bararku uga dhaco.

La hadal dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto:

- In calaamaduhu sii xumaanayaan
- Finan aad iyo aad u xanuun badan
- Fin aan yaraanin oon baabini 14 cisho gudohood
- Fin aad u ballaadhan
- Xummad
- Finan badan
- Liidad cascas oo kasoo baxayay finanka. Taas macneheedu waxay noqon kartaa in xanuunku gaadhay dhiiggaaga.

La hadal dhakhtarkaaga ama kalkaaliso caafimaad haddaad wax su'aalo ah ka hayso ama shaki ka qabto.

8/2007. Developed through a partnership of Mount Carmel Health, Ohio State University Medical Center, and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.org.

Boils. Somali.